Majiro Shay Ilaahay kaga qiimo badan ducada

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: "Majiro Shay Ilaahay kaga qiimo badan ducada."
[Xadiis Xasan ah] [Waxaa wariyay At-tirmidi, Ibnu Maajah iyo Axmed]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay inaanu jirin Shay cibaadada ka mid ah ee Ilaahay agtiisa ka fadli badan ducada, waayo waxaa ku jira ducada in la citiraafo Ilaahay inuu qani yahay Isagaa nusqaan ka hufane, waxa kaloo ku jira ducada in la citiraafo in Adoonku tabar yar yahay oo uu Ilaahay u baahan yahay.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/5509